## Baalka Xogta

Waa maxay farqiga u dhexeeya turjubaan xirfad leh iyo mid aan lahayn, bil matalan saxiib ama qof qoyskaada ka mid ah?

| |
|---|
| Turjubaanka xirfadda leh waa uu qarinayaa xogtaada **sirta ah**. **Marnaba** kama uu hadli karo arrimaha looga hadlay shirka – xataa ma uu qiri karo inay kuu turjubaaney. |

Waxaa kaloo jira farqiyo kale:

| **Turjumaha tababaran** | **Turjumaha aan tababarneyn** |
|---|---|
| • Waxaa xiraya shuruudo ah inuu hayo arrimaha sirta ah | • Ma laha shuruudo xiraya, taasoo micnaheedu yahay haddii ay doonaan xogtaadii kuu gaarka ahaa qof kale ayeey u sheegi karaan |
| • Waxaa uu u gudbinayaa wax kasta si buuxda & saxna ah, muhiimadda weyn keliya ma ahee, wax kasto ayuu faahfaahinayaa | • Ma u badna in si sax ah uu kuugu soo gudbiyo muhiimadda ugu weyn iyo faahfaahintaba, tasoo keeneysa ujeedadii hadalkaasi oo qaldama |
| • Waxaa uu soo gudbinayaa hadalka sida uu yahay iyo si xirfad leh, isagoon muujineyn dereemayaasha sida aamin darro, shaki, doodid, ku raacid | • Waxaa ka suurowda inuu bedelo oo uu sifeeyo oo uu qurxiyo hadalka, isagoo ka saaraya micnihii ugu weynaa |
| • Haddii ay ku fahmin waa ay kuu sheegayaa kuna wereysanayaan qeexitaan | • Waxaa dhici karta inuu hadal aan jirin sheego ama uu ka tago ama uu u arko inuu yahay mid ku adag ama farsameysan |
| • Qoraal ayuu qaadayaa hadalka muhiimaddiisa si uu u hubsado inuu waxba ka fakan | • Waxaa uu si buuxda iskugu haleyayaa xusuus gaaban, taasoo aad aga fog wanaag haddii uu tababar jirin |
| • Waxaa dhici karta inuu hadalka joojiyo oo uu ku wareysto qeexitaan ama inaad dib ugu soo celiso si uusan u qaldamin | • Waxaa uu u muuqan karaa inuu si wanaagsan uu ugu hadlayo luuqadda sababtoo ah ma ay joojiyaan hadalka si ay u weydiistaan caddeyn ama iska hubin |
| • Waa uu ogyahay inuu ku xad gudbi karin oo uu ka ahaado dhexdhexaad. In aragtidiisa gaarka ah uu dhiiban karin ama talo bixin karin oo uu keliya turjumo, arrimo kale uu gelin | • Kama uu warhayo waxa uu ku xadgudbayo, waxaana dhici karta inuu bixiyo fikrad isaga u gaar ah ama talo, ama uu matalo kaalin kale, sida inuu gaari kugu qaado |
| • Waxaa uu leeyahay xirfad gaar u ah qaybta uu ka turjubanayo | • Ma uu qabo wax xirfad ah |

**Qatar ha gelin naftaada iyo tan reerkaada marnaba ha isticmaalin turjubaan aan xirfad lahayn ama inuu qof reerkaada ka mid ah kuu turjubaano.**

**Maxaan xaq u leeyahay?**

Waxaad xaq u leedahay inaad marar kala duwan wareeysato turjubaan.

- Sharci ahaan waxaad xaq u leedahay inaad dalbato turjubaan xirfad leh goorta aad la kulmeyso dad fadhiya xafiiska dowladda, isbitaallada, maxkamadda iyo boliiska. Ruux kaa qaadi karo xuquuqdaas ma jirto. Sidaas daraateed, ha ka yaxyaxin ama ha ka xishoon inaad wediisato turjubaan.
- Waxaad kale oo aad sheegan kartaa inaad dooneyso turjubaan kula jooga ama mid ku turjuma telefoonka. Kugulama talineyso in laguugu turjubaano telefoonka haddii wada hadalkaadu uu yahay mid dheer ama adag ama arrin niyad kac leh tahay.
- Xataa haddii uu Ingiriiskaagu uu iska wanaagsan yahay, waxaad xaq u leedahay inaad ku hadasho luuqadaada, taasoo dadka ay markasta si buuxda ay arrimahooda ugu qeexi karaan. Mararka qaarkood, waxaa dhici karta inaadan kalsooni ku dareemin inaad ku hadasho luuqadda Ingiriiska, ama inaadan aqoon u laheyn hadal xirfadeedka taqtarrada ama sharciyaqaanka ay isticmaalayaan, ama inaadan fahmin lahjadda uu qofka xirfadeedka isticmaalayo.

## Sidee baan ku heli karaa turjubaan?

- Goorta aad ballanta ka sameysaneyso qofka shaqaalaha xirfadda leh oo ku hadla luuqadda Ingiriiska, waxaad marka hore iska hubisaa inaad sii dalbato turjubaan xirfad leh. Ha'yadda qasab ayeey ku tahay iney kuu diyaariyaan turjubaan, badina, waa ay bixiyaan qarashkiisa.

## Maxaad sameyneysaa haddii aad la kulanto turjubaanid xun?

- Haddi aad kulanto turjubaan xun, fadlan ka dacwoo. Haddii aadan ka dacwoon was isbeddelayo ma jiro isla markaasna dad kale oo aad isku waddan tihiin ayaa dhibaato ay ku dhici kartaa iyagoo aan fahmayn meesha laga heysto. Haddii aad arrintaasi bedesho, qof kasta oo ka mid ah dadka aad isku waddanka tihiin iyo ummadda kaleba way kaa faaiideysanayaan.
- Xagga caafimaadka haddii aad ku qanci weyso turjubaan, waxaad ka dacwoon kartaa Wakiilka Caafimaadka iyo Naafada. Waxaad ka heli kartaa qoraalkooda isagoo la turjumay, "Diyaarinta iyo Xallinta Dacwada", ama xaqaada ka dhegeyso luuqaadaada , bogga internetka: http://www.hdc.org.nz/complaints.

## Fadlan u gudbi warbixintan qof kasta oo ka mid ah dadkaada.

Qaado baalkan haddii aad u baahan tahay turjubaan:

| | |
|---|---|
| I speak Somali | Waxaan ku hadlaa Soomaali |
| I need an interpreter, preferably | Waxaan u baahanahay turjubaan, midka |
| ☐ Onsite | ☐ Goobtan imaanaya |
| ☐ Telephone | ☐ Telefoonka |

Wixii intaa ka badan, fadlan kala soo xiriir:

Telefoonka: (04) 384 2849 ama 0508 468 3777

Emeelka: info@interpret.org.nz

Booqo bogga Turjubaanidda New Zealand: www.interpret.org.nz